Jamhuriyadda Dimoqradiga Somaliya
WASARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA

# WAXBARASHADA DADKA WAAWEYN
## BUUGGA KOWAAD

PJ
2532
.W39
1972b
v.1

GUDDIGA AF SOMALIGA
— *MUQDISHO 1972* —

DSCH
AFL 5065

# HORDHIG

Guyaal fara badan, ayaa afkeenna hooyo'eed innaga tirsanayey oo sida Af shimbireedka in lagu hadlo mooyee, aan wax lagu qori jirin. Taasna sababta ugu weyni waxay ahayd gumeystaha oo nagala dagaallamayey in afkeennu dhaqan galo oo ka qayb galo tartanka afafka adduunka ka taagan iyo si dhaqankeenna oo dhammi u lumo. Ummad kastana waxa qarannimadeeda iyo midnimadeeduba ku xiran tahay dhaqanka iyo hiddaha ay iyadu gaar ahaan isaga leedahay. Sida keliya ee lagu kaydin karaa amalagu muujin karaa, waa iyadoo afka ummaddaasi leedahay uu qoran yahay.

Waxa maanta ummadda Somaliyeed oo idil sharaf u ah tallaabadaas taariikhda leh ee uu ka qaaday Kacaankeenna barakaysani ee 21kii Oktobar 1972 lagu dhawaaqay qorriinka afka hooyo. Runtii, maanta keliya ayey Somaliya yar iyo weynba ka xorowdey maskaxda, caqliga iyo fikraddaba.

Waxa sharaf weyn ii ah inaan shacbiga Somaliyeed oo idil ugu hambalyeeyo qorriinka afkooda hooyo oo maanta waxbarashadooda jid cad oo toosaan loogu soo bandhigay. Isla markaas waxaan hambalyo diirran iyo mahad aan la koobi karin uga celinayaa Kacaankeenna barakaysan ee uu hoggaamiyaha u yahay aabbaha ummadda Somaliyeed iyo macallinka garashada, Jaalle Sarreeye Gaas Moxamed Siyad Barre, guushaas lama illaawanka ah uu u soo hoyiyey ummadda Somaliyeed.

Waxaan kaloo mahad weyn uga celinaya, dhaxalkaas maguuraanka ah, Guddiga Afka Somalida. Guddigaas oo runtii maalmo iyo habeenno badan u soo jeeday si uu ku muujiyo xilkasnimada ummadda Somaliyeed iyo karaankeeda, si hagaagsanaan uga soo baxay hawshii loo xil saaray. Taasina waxay marag cad u tahay in qofka Somaliyeed, hadduu ku tallamo inuu wax qabto, in kastoo uusan khibrad badan u lahayn, inuu si fiican, lib iyo guulba uga keeni karo.

Haddaba albaabkaas furan, qof walbow inaan lagaaga horrayn ku tasho. Yar iyo weynba, waxaynu maanta bilawnay waxbarasho hor leh. Taasoo qof walba fursad weyn siinneysa siduu cilmiga heer sare uga garri lahaa. Gaar ahaan dadka waaweyn ee waaya-aragga ah, waxa keliya ay u baahan yihiin waa inay isku duwaan cilmiga iyo aqoonta ay madaxa ku hayaan. Taasna waxàa ka xiga oo keliya inay bartaan labo iyo soddonka xaraf ee summadda farteenna ah iyo sida laysugu daro iyaga, sidii uu horeba u tilmaamay Madaxweynaheennu. Waxaana aabbayaasha iyo hooyooyinkaba la gudboon inay ilmahooda dhaxal qoran uga tagaan. Haddaba qof kastow cid waxbar, waxna baro - qaado oo bixi - oo waxaan kugu guubaabinaya «Yaan laga badin!».

Jaalle Gaashaanle
CABDIRISAQ MAXAMUD ABUKAR
Xoghayaha Wasaradda Waxbarashada
iyo Barbaarinta

# ARAR

*Buuggan oo ah mid loogu talagalay inay wax ka bartaan dadka waaweyn ee afkoodu Somali yahay, waxaa ku jira casharro aad looga shaqeeyey oo si gaar ah loo dooray, lana filayo inay noqdaan casharraddaasi kuwo u qalma ulajeeddadii laga lahaa ee ahayd wax barashada dadka waaweyn.*


*Casharrada buuggan ku yaal waxay ka kooban yihiin qaybo badan oo kala duwan kuna saabsan wax barashada dadka waaweyn ee laga rabo inay gaaraan heerka wax qorista iyo kala qeexidda higgaadda af Somaliga.*

*Waxa kale oo buuggan casharradiisa ka mid ah, guudmar xagga Hiddaha iyo Dhaqanka, Diinta iyo Taariikhda Islaamka, Dhaqaalaba, aqoonta guud iyo waxyaalo kale.*

*Waxaannu ku niyadsan nahay in buuggani waxtar weyn u yeesho dadkii akhrista oo dhan.*

**GUDDIGA AF SOMALIGA**

## CASHARKA KOWAAD



**A, a – E, e – I, i – O, o – U, u**

**1 Af**

**2 Eey**


**3 Il**

**4 Olol**

**5 Ul**

DIGNIIN: Ardaygu si fiican ha u kala barto labada dhigmo ee xaraf walba leeyahay.

## CASHARKA LABAAD




**Aa — Ee — Ii — Oo — Uu**


**1 Aar**
**2 Kuul**
**3 Doon**
**4 Diir**
**5 Eebo**

**aar iid uun eebo ood**

**baal diir kuul deero doon**

DIGNIIN: Ardaygu ha qoro erayadan, isaga oo dhab u eegaya xarfaha.

## CASHARKA SADDEXAAD





**B, b – C, c – D, d - dh – F, f**

**1 Bil**
**2 Dibi**
**3 Dhalo**
**4 Caaro**
**5 Fure**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **B, b :** | **bil** | **bal** | **dab** | **beer** |
| **C, c :** | **caaro** | **curre** | **cambe** | **sac** |
| **D, d :** | **dibi** | **daab** | **dugsi** | **badan** |
| **dh :** | **dhalo** | **dheri** | **dhiil** | **fandhaal** |
| **F, f :** | **fure** | **faras** | **firimbi** | **feynuus** |

**Layli:**

1. Baabuurkii ardo badan baa raacday.
2. Ciddeennu sac caano badan bay leedahay.
3. Dugsigu waa daar aad u cad
4. Gabadhu dhiil caano dhey ah bay keentay.
5. Afar fuundi oo farsamo fiican.



G, g – H, h – J, j - Kh – K, k

1 Goroyo
2 Hal
3 Jubbad
4 Khalfad
5 Kursi

G, g : geri dugsi buug sagaaro
H, h : hir rah huuri haramcad
J, j : jabiso jeer joodari burjiko
K, k : koor kab ukun barkin
Kh : khoori khal khad makhaayad

Layli:


1 Gelle dugsiga wuu dhigtaa.

2 Haanta gudaheeda biyaha ka engeji.

3 Ha jibin fijaanka iyo burjikada.

4 Badda kalluun badan baa ku jira.

5 Khadda iga sii khalfadda.



**L, l – M, m – N, n - Q, q – R, r**

1 Ri'
2 Nal
3 Lacag
4 Qaanso
5 Maroodi

L, l : lacag libaax aleel luul
M, m : maroodi mindi mulac dameer
N, n : nal nibiri nood inan
Q, q : qaanso qufad aqal qalin
R, r : ri' rati rooti badar

Layli:


1 Laanta liin badan baa ku taal.

2 Maanta meeriska lama dhameyn karo.

3 Isniintu waa maalintii Nabigeennu dhashay oo hadana dhintay.

4 Qalinka aqalka ka soo qaad.

5 Ruqiyaa arigii raacday.




## S, s – Sh – T, t – W, w

1 Saacad
2 Wiyil
3 Taallo
4 Shabeel
5 Xiddig

S, s : saacad miis basal suun
Sh : shanlo-shimbir shabeel ashuun
T, t : taallo teneg tufaax rati
W w : wiyil webi farow dawoco
X, x : xiddig xarig abxad dayax

Layli:

1 Samantar saacad suun. cusub buu sitaa.


2 Shan shilin ma lagu heli karaa shan shaati?

3 Timirta dalkeenna ka taran badan tan dalalka kale.

4 Waraabuhu ka weyn dawacada, wiyishana ka yar.

5 Dayaxa iyo qorraxduba waxtar weyn bay u leeyihiin dalka iyo dadkaba.

## CASHARKA TODDOBAAD




**Y, y – '**

1 yaambo

2 Go'

**Y, y :** ayax, arday, yaxaas

**' :** go', la'aan, lo'

**Layli**

1 Ardaygu waa inuu ku shaqeeyaa yaambada markii uu beerta falayo.

2 Lo'du ma caano laa' ee jiilaal bay joogtaa.

## Iskuday inaad akhridid alifkan:

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| B | T | J | X | KH | D |
| R | S | SH | DH | C | G |
| F | Q | K | L | M | N |
| W | H | Y | ' | | |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| b | t | j | x | kh | d |
| r | s | sh | dh | c | g |
| f | q | k | l | m | n |
| w | h | y | ' | | |

Shaqal gaaban:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| a | e | i | o | u |

Shaqal dheer:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| aa | ee | ii | oo | uu |

## CASHARKA SIDDEEDAAD

### LABALAABKA B, D, G, L

Harfaha kor ku yaal waxay noqdaan labalaab, haddii dhawaaqoodu adkaado.

— Waa gabbaldhac ee meesha ka tag.
— Taasi waa kubbad la ganay.
— Waddada dhagaxtuur wax ka qurxoon.
— Dhaanku waa saddex subaxle.
— Xoogga dalka aad baa loogu kalsoon yahay.
— Togga Dhegenle lagama waayo libaax dad qaad ah.
— Gugu wax ka hillaac badan.
— Lagu liibaan jaalle Siyad xukunkiisa.

Layli:

Qor 10 oraahood ooy ku jiraan: b, d, g, l, labalaaban, iskana dhawr erayadii laguugu caddeyey casharkaan.

## CASHARKA SAGAALAAD

### LABALAABKA M, N, R

Xarfahani waa labalaabmaan sidii kuwii hore.

— Calankeennu ammaan buu mudan yahay.

— Afrikada Koofureed wax ka dheemman badan.

— Magaalada Jannaale wax ka cunno macaan.

— Dilku ma bannaana xis iyo sharciba.

— Caro darteed carrada cantuug.

— Berri iyo saadambeba waa iid..

— Wiilkaasi aayadiis ma jecla.

— Dooxadu cayo badanaa.

Layli:

Qor 10 oraah oo ay ku jiraan m, n, r, oo labalaaban, adiga oo ka fogaanaya erayda ku jira casharkan.

## CASHARKA TOBNAAD

### SHALAY

Shalay baan baabuur soo fuulay.
Cabdi wuxuu joogaa dugsiga.
Iyagu waxay aadeen Marka.
Dugsigeennu waa weynaa.
Ardaygu wuxuu gatay nacnac.
Xalimo waxay jirtaa Hargeysa.
Macallinku wuxuu iigu yimid guriga.
Walaalkay baa ila hadlay.
Radiyo Muqdisho baan dhegeystay.
Geelu waa oomanaa.
Geedku wuu gaabnaa.
Dibigu wuxuu lahaa tuur weyn.
Dhirtu way cagaarnayd.
Xagaagii wuu roob yaraa.

Layli:

Macallinku arδada ha u yeeriyo casharka, ka dibna kor ha u akhriyeen.

## CASHARKA KOW IYO TOBNAAD

### MAANTA

Maanta waa maalin wanaagsan, saacadduna waa shantii aroornimo.

Midabka faraskaygu waa xamar.

Geelle waa arday.

Habboon waa gabar fiiro dheer.

Ashkir waa arday fahmo badan.

Jidka ka gudub oo ka talaab.

Ma nabad baa?

Haah, waa nabad.

Sidee tahay?

Mahadsanid, waan ladnahay.

Iska warran?

Waa nabad!

Xaggee buu jiraa Geelle?

Isagu wuxuu jiraa Beledweyne.

Shaah ma cabbaysaa?

Haah; waan cabbayaa.

Layli:

Ardaygu ha qoro casharkan, dhawr jeerna ha akhriyo.

## CASHARKA LABA IYO TOBNAAD

### **BARASHADA SAACADDA**

Saacaddu waa intee?

Saacaddu waa hal saac iyo nus . . . . . . . . . . 1:30

Saacaddu waa laba saac iyo rubi . . . . . . . . . . 2:15

Saacaddu waa saddex saac . . . . . . . . . . . 3:00

Saacaddu waa afar saac iyo shan daqiiqo . . . . . 4:05

Saacaddu waa lix saac . . . . . . . . . . . 6:00

Saacaddu waa toddoba saac . . . . . . . . . . 7:00

Saacaddu waa siddeed saac . . . . . . . . . . . 8:00

Saacaddu waa sagaal saac . . . . . . . . . . . 9:00

Saacaddu waa toban saac . . . . . . . . . . . 10:00

Saacaddu waa kow iyo toban saac . . . . . . . . 11:00

Saacaddu waa kow iyo toban iyo afartan daqiiqo . . . 11:40

Saacaddu waa kow iyo toban iyo konton daqiiqo . . . 11:50

Saacaddu waa laba iyo toban saac . . . . . . . . 12:00

## CASHARKA SADDEX IYO TOBNAAD

### WAREYSI GAABAN

Cali : Magacaa?

Cabdi : Magacaygu waa Cabdi.

Cali : Xaggee buu jiraa agaasimihii xafiiskan?

Cabdi : Ma uu joogo, wuxuu jiraa Hargeysa.

Cali : Ma ii sheegi kartaa goorta uu imanayo?

Cabdi : Wuxuu imanayaa berri galab.

Cali : Maxaad (adigu) ka doonaysaa?

Cabdi : Waxaan ka doonayaa shaqo.

Cali : Shuqul hadda ma hayno ee mar dambe soo noqo.

Cabdi : Goormaan soo noqdaa?

Cali : Waxaad soo noqotaa laba beri kaddib.

Cabdi : Waa yahay. Mahadsanid.

Cabdi : Hadda waa aan tegayaa ee iga raalli noqo, haddaan ku dhibay.

Cali : Nabadgelyo.

## CASHARKA AFAR IYO TOBNAAD

### TIIRARKA ISLAAMKA (*)

Sidee lagu ogaadaa qofku inuu islaam yahay ?

Qofkii islaam ahi waa inuu shanta tiir ee diinta Islaamku ku dhisan tahay rumeeyo.

1. Ilaah iyo Rasuulkeenna Maxamad ah in la rumeeyo.
2. Shanta salaadood, waqtigooda, in la tukado.
3. Sakada, waqtigeeda, in la dhiibo.
4. Bisha Soonqaad in la soomo.
5. Xajkana in la guto bisha Arafa, qofkii awoodi kara.

Layli:

1. Qor Tirarka Islaamka?
2. Goormaa Xajka la gudan karaa?

(*) Waa Shanta Diini Islaam.

## CASHARKA SHAN IYO TOBNAAD

### WADAJIR IYO ISKAASHI

Wadajirku wuxuu inoo keenaa xoog iyo liibaan. Markii dadku wadajir wax u qaybsado, ayuu kartidii nolosha uu kaga hor tegi lahaa yeeshaa. Noloshu waa ay qallafsan tahay haddii qof qof looga hor tago. Bal eeg cayayaanka iyo ugaarta ama dugaagga qaarkood, iyagu nolosha waxay kaga hor tagaan wadajir iyo iskaashi. Quraanyada iyo shinnidu wadajir iyo koox koox, bay wax u qabsadaan, yeeyduna wadajir bay wax u ugaarataa, duurjoogtuna koox koox bay u wada socotaa. Gabayaaga Somaliyeed Cabdullahi Muse, isaga oo ka hadlayey wadajir iyo iskaashi wuxuu gabay ku yiri:

Taageeraday laba gacmood tabar ku yeeshaane
Tiska waxa la qaadaa markay tiirisaa bidixe
Hadday midigtu keli taagan tahay tahar ma gooyseene
Tuulaha magaaliyo halkaa teeyo lagu raaco
Haddii aan midun tegi lahaa tii kalaa maqane.

## CASHARKA LIX IYO TOBNAAD

### SAAXIIB WANAAGSAN

Saaxiib waa qofkaad is-af garataan oo ay fikraddiinnu is-raacdo. Saaxiibnimadu waxay ka timaaddaa isbarasho, lays dhaqan iyo sheeko bartaa.

Saaxiibnimadu waxay keentaa xiriir gaar ah iyo isu dhowaan kalgacal leh. Saaxiibka wanaagsan waa kan gacanta ku qabta, samaan ku fara, wixii xunna kaa reeba, wixii uu jecel yahayna kula jeclaada.

Saaxiibka wanaagsani waa kii markaad bukooto ku soo booqda, haddii dhib weyn ku gaarana had iyo jeer ku garab taagan.

Saaxiibnimada wanaagsan waa midda labada qof tusta xiriirka kalgacalka leh iyo is jeclaanta. Saaxiibnimo ma aha sida dadka qaarkiis u yaqaanno ee ah in wax xun lays faro, ballanfur iyo dhagarna lagu dhaqmo. Saaxiibnimada wanaa-geedu waa: in lays kaalmeeyaa, wixii fiican laysu sheegaa, wixii xunna layska reebaa, Ilaah cabsidiisa lays faraa, dadkana la xaq dhawraa.

Waxaa jira dad iyo duunyo saaxiib ah, oo wax istarkooda ayan ka liidan saaxiibnimada dadka u dhaxaysa; sida eeyda, daayeerrada, fardaha iyo kuwo kale oo badan.

Mararka qaarkood waxaa la arkaa in buug aad ka yeelatid saaxiib, maxaa yeelay isagu sheeko ama cilmi aadan horay u aqoon buu ku siiyaa. Taasina kaaga roon saaxiib xun oo waqtiga bilaash, ama waxaan macna lahayn kaaga dhumiya.

L a y l i:

1. Sheeg saaxiibka fiican iyo kan xun waxay ku kala duwan yihiin ?
2. Ma suurowdaa dad iyo duunyo inay saaxiibaan ?
3. Saaxiibnimo maxay tahay ?

## CASHARKA TODDOBA IYO TOBNAAD

### DERISKA

Derisnimadu waa wax addunka oo dhan laga yaqaan. Diinta Islaamkana aad iyo aad bay u ammantay oo waa ay kala caddeysay dadka deriska ah xuquuqda ay isku leeyihiin. Addunka horumaray wuxuu isu kaashadaa derisnimo oo waa laga ilbaxay xigaaladii la isu raaci jirey waagii hore.

Labadii qof oo deris ahi, waa isaga dhow yihiin dadka kale maxaa yeelay, iyagaa isku dan ah oo isu baahan goor walba. Cidihii deris ah waa inay is xaq dhawraan, wixi xumaan keni karana iska ilaaliyaan.

Derisnimadu waxay kufiican tahay in qofkii buka kan kale soo booqdaa, hawlaha culculusna waa inay isu kaalmaystaan, dhibaatada carruurtu ay keenaysana laga reebaa, nabadgelyana lagu wada noolaado. Deriskii sidaas ku kaca horumar ayuu gaaraa.

Xuquuqda derisku isku leeyahay waxaa kamid ah :

alaabta oo la iska qaato,

haddii qof jirrado oo lays booqdo,

waqtiga hurdada oo aan laysku qayliyin,

hawsha culus oo la isla qabto.

Somalidu mahmaahyo badan bay ka tiri derisnimada. Waxana ka mid ah : Dhalyadaada dhaqanwadaagaa kaaga roon.

Layli :

1. Ka sheekee deriska wanaagsan ?

   Oraah ku dar erayadaan :

   Xaq, booqasho, adeeg, is-kaalmeysasho.

2. Keen mahmaah deriska ku saabsan ?

## CASHARKA SIDDEED IYO TOBNAAD

### HEELLO

Gorayadu ilmaheeda,
Aroori bay dhigtaayoo,
Aboodigu ku laayaa;

Shimbirtuna aroos ay,
Ilxidhoo ammana bay,
Ubadkeeda seexisaa,

*Kala awran labaduye,*
*Edebtiyo aqoontiyo,*
*Asluubtay isku dhaafeen,*
*Caqligii wanaagsani,*
*Itaal inuu ka roon yahay,*
*Bal eegoo u fiirsada.*

Ilka weynow maroodigu,
Aradaduu mirtaa buu,
Cadawgu ka ugaadhaa,

Aboorkuna dudumadaan
Aragnay buu dhistaayoo,
Naftiisa ku ilaashaa,

*Kala awran labaduye,*
*Edebtiyo aqoontiyo,*
*Asluubtay isku dhaafeen,*
*Caqligii wanaagsani,*
*Itaal inuu ka roon yahay,*
*Bal eegoo u fiirsada.*

Ma ogtihiin sagaaradu,
Awaarahay qoddaayoo,
Saaladeeda ku aastaa,

Libaaxuna ma asturee,
hilammaduu ku aroortu,
Digadiisa ku aslaa.

*Kala awran labaduye,*
*Edebtiyo aqoontiyo,*
*Asluubtay isku dhaafeen,*
*Caqligii wanaagsani,*
*Itaal inuu ka roon yahay,*
*Bal eegoo u fiirsada.*

XASAN SHEKH MUMIN

CASHARKA SAGAAL IYO TOBNAAD

## TAALLADA DALJIRKA DAHSOON



Taallada Daljirka Dahsoon way ka duwan tahay taallooyinka kale oo dalka ku yaalla, maxaa yeelay, taallooyinka kale waxaa loo dhisay qof wax weyn sameeyey ama koox u hurtay nafteeda dalka.

Taallada Daljirka Dahsoon, waa mid qofkii dalka u dhintay ama u halgaamy loo dhisay. Taalladaasi kuma koobna dadka dalka gudihiisa ku dhintay ama kuwa la ogyahay keliya, ee waxay u dhisantahay dadkii u geeriyoodey dalkooda.

Taalladaas markasta waa la tagaa oo waxaa la dhigaa ubax, taas oo ka dhigan xusuus loo niyoodey Daljirka Dahsoon.

Qofkii dalka u dhinta isaga oo daacad u ah, adduun iyo aakhiraba liibaan buu leeyahay. Qofka waddaniga ah, is tustus uma sameeyo hawsha waddanka. Qalbiga kagama jirto abaalgud ku hel wanaagga uu u qabto waddankiisa oo wuxuu yahay nin naftiisa hawl u qabtay. Dalka daaficiisa iyo wanaajiskiisa qof walba oo Somali ah waa ku sandulle oo waa ku waajib.

Taallooyinkaas waxaa la dhisay dhowaan, ka dib, markii uu Kacaanku ka dhashay dalkeenna.

Waagii hore lama aqoon taallooyin dhismo dad u eg ay ka taagan yihiin. Haddase, Xamar waxaad ku arki kartaa Maxamad Somali oo dagaal ku jira, dhagaxna cadawga ku tuuraya.

Sidaas daraadeed goobihii lagula dagaallamay gumeystaha ayaa laga taagay taallooyin xusuus wanaagsan Waddanka u leh.

L a y l i :

Erayadan oraah ku dar :
daljir, xusuus, daacad, dadaal, liibaan.

1. Sheeg taallada daljirka dahsoon waxay kuwa kale kaga duwan tahay;

2. Taallada daljirka dahsoon yaa loo dhisay ?

3. Sheeg sababta ubax loo saaro taallooyinka?

## CASHARKA LABAATANAAD

### WAQTIGA

Haddii aan doonayno in aan ogaanno waqtiga, waxaan fiirsannaa saacadda. Saacadda saxankeeda waxaa ku qoran laba iyo toban lambar, waxaana ku kor dadban laba carrab oo kala gaaban. Kan dheer wuxuu xisaabaa daqiiqadaha, kan gaabanna saacadaha. Saacadaha qaarkood waxaa laga helaa carrab aad u yar kana orod badan kuwa kale, wuxuuna tilmaamaa libiqsi.

Lixdankii libiqsiba waa hal daqiiqo, lixdankii daqiiqana waa hal saac. Afar iyo labaatan saacna waa hal maalin (habeen iyo dharaar). Toddobadii maalmoodna waa toddobaad. Afartii toddobaadna waa bil. Laba iyo toban biloodna waa sannad, ama 365 maalmood. Boqolkii sanana waa qarni. Waqtigaas aan ka soo hadalnay waa sannadka qorraxda. Dunida inteeda badani, waxay tirsataa sannadka qorraxda. Qofku wuxuu da'diisa ku tirsadaa maalmaha, bilaha iyo sanooyinka.

Maalmaha toddobaadku waa:

1. Sabti
2. Axad
3. Isnin
4. Talada
5. Arbaco
6. Khamis
7. Jimce

Sannadka Dabshidka :

| | | | |
|---|---|---|---|
| Diracgod | = | 31 Janayo | Jilal |
| (*) Lixkor | = | 28 Feberayo | |
| Toddob | = | 31 Marso | |
| Fushade | = | 30 Abril | Gù |
| Gusore | = | 31 Mey | |
| Samulad | = | 30 Jun | |
| Dirirsagaro | = | 31 Lulyo | Xaga |
| Laxadhaqo | = | 31 Agosto | |
| Samalaho | = | 30 Setembar | |
| Kalahan | = | 31 Oktobar | Deyr |
| Dambarsame | = | 30 Nofembar | |
| Baldaq | = | 31 Disembar | |

L a y l i :

1. Halkii saac waa immisa daqiiqadood ?
2. Toddobaadku waa immisa maalmood ?
3. Laba iyo tobankii bilood waa immisa sanradood?
4. Konton toddobaad waa immisa maalmood ?
5. Bilaha sannadka ku qor buuggaaga.

(*) Bisha Lixkor, 3 sannadood ka dib, waxay noqotaa 29 ayaamood.

## CASHARKA KOW IYO LABAANTANAAD

### M A G A C A

Wax kasta oo addunyada joogaa waxay leeyihiin magac. Ieeda kale, eraygii qodob qaataba waxaa la yiraahdaa magac.

Magacu wuxuu u kala baxaa: magac lab iyo magac dheddig.

Magac lab: wiil, libaax, rati, gorgor, orgi, dugsi, dayax, durdur, qalin, radiyo, iwm.

Magac dheddig: gabar, gool, hal, rì, dafò, daar, qorrax, il, lacag, warqad, iwm.

L a y l i :

Qor 10 magac oo lab ah, iyo 10 magac oo dheddig ah, iyaga oo isu dhigma, adiga oo aan ka qaadan midna kuwii casharkan lagu sheegay.

## CASHARKA LABA IYO LABAATANAAD

### MAAHMAAHYO

Maahmaahda Somalida xigmad weyn ayaa ku jirta. Xigmadda Somaliyeedna way fara badan tahay.

Qof kasta oo Somali ah maahmaahda wax uun buu ka yaqaan. Maahmaahdu waxay ka hadlashaa wax dhab ah. Somalidu been kuma maahmaahdo.

Maahmaahdu waxay u baahan tahay in si dhab ah, loogu fiirsado oo looga faalloodo. Runtu dhinacyo badan bay leedahay, sidaas daraaddeedna maahmaahdu waxay ka hadli kartaa dhinacyo badan oo kala jaad ah ee nolosha ku saabsan.

Bal maahmaahyahaan ka faallood ee una fiirso :

1. Bohol hadimo ha qodin haddaad qoddana ha dheerayn ku dhici doontaana lama oga.

2. Dhicisku inta birta loo soo sido, ayuu bakhtiyaa.

3. Sagaaro laba tun oo la kala qaado ma leh.

4. Talo waa mar aad garan weyday iyo mar aad gaari weyday.

5. Ilko wada jir bay wax ku gooyaan.


6. Dhul hagar ma leh, dad baase hagar leh.

7. Ayax teg eelna reeb.

8. Nimaan weer sugin waran ma sugo.

9. Waxa uurkaaga ku jira afkaa kaa xada.

CASHARKA SADDEX IYO LABAATANAAD




## LABADA GOBOL ISKU DARKOODA

Intii aan gobannimada la gaarin ka hor, waddanka Somalidu shan gobol buu ahaa. Shantaasu waxay ahaayeen gobolka Koofureed, gobolka Woqooyi, gobolka Galbeed, gobolka N.F.D. iyo gobolka Jabuti. Markaasaa meel walba Somalidii joogtey gobannimo u qaylisay, markii dambe gobolladaas aan sheegnay guddi ka socda, ayaa Xamar shir ku qaatay oo waxaa lagu heshiiyey in Somali weyn la dhiso, wadajirna waxaa lo doonay

in shanta gobol oo Somaliyeed mar keliya laysku daro oo sidaas ay ku dhalato Somali weyn.

Taladii toosnayd ee Somalidu isku raacday, Ingiris ayaa diidey oo hor joogsadey in la dhiso Somali weyn. Taariikhdu markay ahayd 26 Jun, 1960 baa gobolka woqooyi gobannimo qaatay. Shan maalmood ka dibna kowdii bisha Lulyo oo isla sannadkaas ah baa koofurtuna dawladnimo qaadatay. Isla maalintaas baa waxaa la saxiixay isracii labada gobol oo maanta la yiraahdo: Jamhuriyadda Dimoqradiga Somaliya.

Somali weyn waxaa ka maqan saddex gobol oo aan weli gobannimadoodii helin. Gobolladaasi waa : N.F.D., Somalida Galbeed, iyo Xebta Somalida ee Faransisku gumeysto.

Layli :

1. Qor adoo ka sheekaynaya labada gobol.
2. Oraah ku dar erayadan hoose :
   wadajir, israac, shir, Somali weyn
3. Goormaa gobolka Woqooyi iyo kan Koofureed laysku daray ?

## CASHARKA AFAR IYO LABAATANAAD

### BANGIGA

Bangiga dalku wuxuu ilaaliyaa dhaqaalaha dadka horukaciisa. Dadka Somaliyeed wuxuu kaydkiisa dhigtaa bangiga dalka. Bangi waxaa la yiraahdaa guriga lacgta dadku dhigto oo ku kaydsado.

Qofku haddii uu lacag leeyahay, waa inuu bangiga dalka lacagtiisa dhigto ee ma aha, inuu dhulka ku xabaasho. Qofku haddii uu dhulka ku xabaasho lacagtiisa ama santuuq ku rito, waxaa la arkaa in laga xado ama uu garan waayo, meshii uu lacagta dhigtay. Qofku haddii uu bangiga dhigto lacagtiisa markii uu doono ayuu ka qaadan karaa. Sanooyin badan hadduu qofku dhigto lacagtiisa bangiga, lagac korsaar ah, ayuu bangigu u oggol yahay.

Bangiga dalku horukaca dhaqaalaha dadkeenna qayb libaax ayuu ka qaataa. Bangigu lacag ayuu amaahiyaa beeraleyda iyo geddisleyda ama iskaashatada farsamada. Bangigu wuxuu illaliyaa lacgta dibedda uga baxaysa dalka. Isagu wuxuu la shaqeeyaa bangiyada dunida oo dhan.

Dahabka, qalinka iyo luulka isaga ayaa qeymeeya. Lacagta dalkeennu haddii ayan ku bixin bangiga dalka oo ay u baxdo dhulalka shisheeyaha, waxay ku khasbaysaa bangiga dalka inuu dahab ku beddelo lacagtii dhulkeenna ka baxday, sidii loogu soo celin lahaa. Sidaas daraddeed dadka wax ka iibsada dibedda waxaa laga doonayaa inay lacagtooda bangiga ku dirsadaan.

Geddisleyda badeecadda ka keenta dibedda iyo kuwa wax ku gata gudaha, lacagtooda waa inay ku dirsadaan bangiga dadka si uu bangigu u ilaaliyo lacagta dadka iyo dalka. Bangiga dalku wuxuu ku beddelaa lacagta shisheeyaha oo dhan lacag Somaliyeed. Lacagtaas waxaa ka mid ah : Dollar, Farank Lire, Rubli, Rubiya, Riyaal, Marki Yen iyo geniga Istarliinka ah. Lacagahaas oo idil waxaa la yiraahdaa «Faluuto» ama lacagta adag. Lacagtu dalka waxay dibedda uga baxdaa, waxaa weeye xatooyo iyo cashuurta oo lagala fakado kastamka. Haddii aan bangiga lagu dirin, middaas dhaqaalaheenna, waxay u keenaysaa dibusocod iyo curyaannimo.

Layli:

1. Bangi maxaa la yiraahdaa ?
2. Hawlaha bangiga wax ka sheeg ?
3. Magacyada lacagta shisheeyaha wax ka sheeg?

## CASHARKA SHAN IYO LABAATANAAD

### ELETERIKA

Eletriku wuxuu dhulka siiyaa ilays had iyo goor. Guryaha, dukaammada, xafiisyada, jidadka iyo waxyaalo kale oo badan ilayska waxaa siiya nalka eleterika. Magaalomadaxda Jamhuriyadda Dimoqradiga Somaliyeed iyo magaalooyin kale waxay leeyihiin warshado siiya habeynkii iftiin iyo ilays.

Eleterikadu waa xoog ilayska dhaliya. Eleterikadu way ku yar tahay dhulkeenna, hase yeeshee xukuumadda Tawriga ahi, waxay ku talo jirtaa in magaalooyinka oo idil loo yeelo eleterik. Warshadaha,baabuurta, dayuuradaha iyo maraakibtu, waxay dhammaantood ku socdaan xoog eleterik ah. Eleterika waxa laga soo saaraa xoogga biyadhaca ama warshadaha ama yuraanyumka ama kulka (fallaaraha) qorraxda. Ileyska eleterika waxa lagu qaadaa siligyo dhaadheer oo yaryar. Siligyadaas yaryari, waxay ku jiraan guryaha, xafiisyada, warshadaha iyo aqallada waaweyn. Wakaaladda Eleterika ee Muqdisho waxa la wareegtey xukuumadda Tawriga ah 1970.

Eleterikadu dhaqaalaha iyo warshadaha horumarkooda qayb weyn ayay ka qaadataa. Xukuumadda Tawriga ahi, waxay ku talo jirtaa, sidii looga soo dhalin lahaa xoogga eleterika biyodhaca degmada Fanole. Mashruucaas markii la dhaqan geliyo, dalka Somalidu tillabooyin waaweyn ayuu ka qaadayaa dhinaca farsamada iyo beerahaba. Wakaaladda Eleterikada waxay leedahay saacado xiisaaba kiilowatka.

Waxaa jira Dowladdu inay ku tala jirto Biyodhac weyn inay ka samayso mesha la yiraahdo «Fanole». Kolkii Biyodhacaasi hagagona waxaa la hubaa in Eleterikada ka dhalata ay gobollada degmadaas ka ag dhow oo dhami ku abuurmi doonaan warshado badan, isla markaas waddanka dhaqaalihiisu kor buu u kacayaa, dadkuna nolol fiican buu ku noolaan doonaa.

Layli:

1. Eleterik maxaa la yiraahdaa ?
2. Eleterikada maxaa laga sameeyaa ?
3. Siligyada yaryar ee eleterikadu maxay qaadaan?
4. Warshaduhu maxay ku socdaan ?

## CASHARKA LIX IYO LABAATANAAD

### WEYSO


Qofku ma tukan karo, haddii uusan weyso qabin.

Weysada horteedna qofka dharkiisa iyo jirkiisuba waa inay daahir yihiin.

Weysada wanaagsani waa inuu qofku ku kaco sida hoos ku qoran:

1. Waa in la niyeystaa.
2. Waa in la fool dhaqdaa 3 goor.
3. Waa in gacanta midig iyo midda bidix, teer iyo xusullada, la dhaqaa 3 goor.
4. Waa in biyo la mariyaa madaxa 3 goor.
5. Waa in biyo la mariyaa dhegaha 3 goor.
6. Waa in sifiican loo dhaqaa labada cagood, teer iyo anqawyada oo midigta la hormariyo, 3 goor.
7. Waa in xubnaha mayristooda sidaas la isugu xijiyaa.

## CASHARKA TODDOBA IYO LABAATANAAD



## DUUNYO

Somaliya waxaa ku nool duunyo badan. Waxay u kala baxdaa: dabjoog iyo duurjoog. Haddii aan kala qaadno labada kooxood waxay yihiin, waxaan ogaanaynaa koox walba sida ay tahay iyo meesha laga helo.

Dabjoogtu waa xoolaha nool oo dadku dhaqdo oo ay noloshiisu ku xiriirto. Waxaa ka mid ah: geela, lo'da, ariga, dameeraha, fardaha, baqlaha iyo kuwa kale. Xoolaha aan sheegnay

badidooda dhawridda iyo xannaanada dadka la'aanteed ma dhaqmi karaan, maxaa yeelay iygu uma baran noloşha dibedda iyo dugaagga la dhaqankiisa.

Dabjoogta lagama maarmo maxaa yeelay dadka noloshiisaa ku dhisan. Duurjoogtu waa kuwa ku nool meelaha aan dadku degganayn. Duurjoogtu ma jacla meesha dadku ku badan yahay ee waa ka fogataa. Dugaaggu mar walba wax buu ugaarsadaa gaar ahaan habeenkii buu jecel yahay. Dugaaggu wuxuu u kala baxaa : libaax, shabeel, waraabe, weer, haramcad, dawaco, guduudane iyo kuwo kale. Ugaartu waa cagaar ku nool, dugaagguse waa hilib ku nool. Qarnigan aan joogno, waxaa jira dalal badan oo ugaar iyo dugaag midna aan lahayn, maxaa yeelay, lama dhawrin oo waa la laayey. Dadka dalalkaas ku nool, waxay u daawasha tagaan dalalka kale ee nafleydaas laga helo. Ugaarta iyo dugaagguba qiimo weyn bay u leeyihiin dhaqaalaha. Sidaas darteed nafleyda waa inaan la dilin.

L a y l i :

1. Erayadan qor oo oraahyo ku dar :

   cagaar ku nool, hilib ku nool.

2. Sheeg waxay ku kala duwan yihiin dugaagga iyo ugaarta ?

3. Kala sheeg dabjoog iyo duurjoog ?

## CASHARKA SIDDEED IYO LABAATANAAD

### «BURAANBUR»

Meeradheeraw hayaan miiggan baynnu nahay,
Maalin iyo layl jid baa lagu majiiran yahay,
Milic qorrax ah mici cadaab weynle mayllin qurac,

Mas duulaagiyo mariidlaw abees wax gana,
Waxaynnu dhex moosi doonna mashaakil badan,
Milil-kunooluhu asquu meel xille ugu dhiman,

Magli-kudhiigluhuna mugdiguu ku lumahayaa,
Meel-kutooskiyo wadaanigaana marinka garan,
Ninkii mukhlisaa xaqlaa macallinkeennu yiri,

Majliska ka caddeeyay ay maalin weyn ahayd,
Waa maqleyseen markhaataana laga ahaa,
Waa midawnoo dariiq baynu wada marraa,

Mabda'a iyo ficilka waynu isla muujinnaa,
Markaan maax gaarno waa miilo qaybsannaa,
Macnuhu kaasuu ahaayoo mid kale tarrixin.

ASLI SHEKH CISE

## CASHARKA SAGAAL IYO LABAATANAAD

### WADDANINIMO

1891 markii Talyanigu qabsaday meelo badan oo xeebaha dhulka Somaliyeed ah, ayuu damcay inuu ku darsado magaalo la yiraahdo «Cadale» oo ku taal Woqooyiga gobolka Benadir. Magaaladaasna, waqtigaas waxaa u Shiikh ahaa, nin lo oran jirey Shiikh Axmed «Gabyow».

Talyaniga iyo gumaysigiisana aad ayuu Shiikhu u diidanaa. Dabadeed, mar la warsaday oo la weydiiyey wuxuu Talyaniga ku diiday, wuxuu gabay masafo ah ku yiri :

Somali aan u dagaallamaynaa,
Dalkan ballaaran u daafacaynaa,
Kuwa dulmaaya la dood gelaynaa,
Kufriga soo degey diida leennahay,
Dantiinnu duul kale dhawrimaysee,
Ha daalinoo u dul qaata leennahay,
Dabaylkii mawdku intuu i daandeyn,
Hilibka duud cunin, oonan deeb noqon,
Dadka tusaan danihiisa leeyahay,
Durriyadaada dab looma aasee,
Kuwa dambaan u dariiq falayaa.

## CASHARKA SODDONAAD

### MAGAC GAAR IYO MAGAC GUUD

Magac gaar waxaa loola jeedaa magacii u gaar ah qof, neef, dal, magaalo, meel, iyo wixii kale oo la mid ah, sida : Adan, Xawo, Dhodi, Xamar, Afrika, Somaliya, Dhagaxtur.

Magac guud waa magacii la wadaago, sida :
Nin, naag, farax, shimbir, deero, aqal, lacag, bad, qalin, xafiis.

### MAGAC QARSOON:

Magac qarsoon waa magacii aan la arki karin ama aan la taaban karin, sida :

Run iyo been waa kala fiican yihiin.
Dugsiga waxaa lagu bartaa cilmi iyo edeb.

L a y l i :

Qor 10 magac oo gaar iyo 10 magac oo guud, adiga oon ka qaadan midna kuwii casharkaan lagu sheegay.

Ka sooc magaca qarsoon magacyada kale :

Kursi, naxariis, beer, dugsi, caraf, geesinimo, ceel, dhawaaq, dhalo, daal.

## CASHARKA KOW IYO SODDONAAD

### DHALASHADA NEBIGEENNA

Dadka Carabta ah, Islaamka hortiis waxay ahaayeen dad go'doon ah oo aan waxba ogeyn. Iyagu badidoodu waxay ahaayeen xoolo dhaqato oo had iyo goor waxay isu leyn jireen qabiilnimo. Caadooyin xunxun oo kalana way lahaayeen. Caadooyinkaas waxa ka mid ahaa, ninkii gabari u dhalato, iyada oo nool innu xabaalo. Haweenka iyo carruurta yaryarna dhaxalka aabbahood lama siin jirin ee hadba ninkii u xoog roon baa xoolaha iyo talada reerkaba yeelan jirey. Taariikhda Masiixigu markay ahayd 571 baa Nebi Maxamad Maka ku dhashay, si dadka Carabta ah Eebbe uga saaro dulligii ay ku noolaayeen.

Nebiga dhalashadiisa ka hor, ayaa aabbihiis Cabdullahi dhintay, habartina Amina, waxay dhimatay isaga oo lix jir ah. Afartan sannadood markii uu gaarey Nebigu, ayaa Eebbe faray inuu dadka oo dhan gaarsiiyo diinta Islamka. Dhawr sannadood markuu magaalada Maka dadkeeda uu diinta ugu yeeray, ayaa Eebbe faray inuu ka tago Maka oo uu aado magaalada Madina, meeshaas oo ay ka abuurantay dawldii Islaamka ugu horreysey.

Ayaantii uu ka tegey Nebigu Maka, ayaa taariikhda Muslimku ka bilaabatay. Taariikhdaasna waxaa lagu magacaabaa «HIJRIYA». Muslimiintii Maka ka soo qaxday ee maalkoodii

iyo guryahoodii ka soo tegey, waxaa lagu magacaabay Muhajiriin. Nebigu markii uu yimid Madina, dadkii diinta Islaamka galayna waxaa la yiraahdaa Ansaar, dhamaantood waxaa la isku yiraahdaa Asaxaab.

Reer Madina wanaagoodi wuxuu gaaray, qaarkood inay xoolahoodii la qeybsadeen walaalahood reer Maka, meeshaas isjeclaan iyo isku kalsoonaan baa ka dhalatay muslimiinta dhexdooda.

Layli:

1. Carabtu, Islaamka hortiis, sidee ku noolaayeen?
2. Sheeg intey ahayd taariikhdii Nebigennu ku dhashay Maka? Maxaase lagu magacaabay taariikhda Muslimka?
3. Maxaa lagu magacaabay dadkii Muslimka ahaa e Maka ka soo qaxay iyo kuwii Madina ee Nebiga raacay?

## CASHARKA LABA IYO SODDONAAD

### DUGSIGA

Xasan Axmad wuxuu ka mid yahay dadka gacanta ka shaqeeya. Wuxuuna leeyahay xaas iyo carruur badan oo ku nool mushaarka yar ee uu ka qaato shaqada. Xasan waxaa dhibaato ka qabsatay xagga dhaqaalaha, isagoo ay ku umushay haweeneydii, carruurtiina qaar ka jirradey.

Sidaas daraadeed, Xasan waxaa dani ku qabatey in uu walaalkii ee deggan Xamar waraaq u dirsado. Laakiin nasiib darro, Xasan wax ma qoro waxna ma akhriyo. Haddaba, Xasan waxaa lagama maarmaan ku noqotay, inuu raadsado qof waraaqdii u qora. Isagoo radinaya qof wax u qora, mudda ka dib, wuxuu helay nin joornaal ku akhrisanaya baar. Wuxuu u sheegtay dantiisii in kastoo uunaan aqoon u lahayn. Ninkiina waa ka yeelay. Isagoo ka xun, Xasan, wuxuu ninkii u sheegtay sirtii iyo dhibaatadii reerkiisa haysatey. Dhib kastaba ha ka maree, Xasan waraaqdii waa diray. Dhibaatadiisa labaadna waxay ahayd markii loo soo jawaabey. Waxaa mar kale qasab ku noqotay, inuu waraaqdii qaado oo ula tago nin kale ee loo akhriyo. Xasan ma jecleyn in la ogaado sirta reerkiisa, laakiin waxaa u kulmay dan iyo tacliin la'aan.

Xasan wuxuu goostay inuu dugsi galo taana waxaa ku dhaliyey dhibaatadii iyo ceebtii uu kala kulmay diriddii war-

qadda. Waxaa kale ee ku geesinnimo geliyey, inuu wax badan arkay dad la da' ah oo wax baranaaya. Mudda ka dib, Xasan wuxuu ka mid noqday dadka wax qora waxna akhriya. Wuxuu gaarey in isagu kaalmeeyo dadka aan wax qorin waxna akhriyin.

Dhibaatadaas Xasan maray, waa mid sugeysa qof kasta ee aan wax baran. Tacliintu waxay ku gaarsiisaa in aad ogaato waajibka ku saaran iyo xaqa aad leedahay.

Qofku wuxuu naftiisa iyo dadkiisa ama dalkiisaba wax u taraa markii uu wax barto. Lagama gaboobo lagamana xishoodo dugsiga ama wax barashada.

Layli:

1. Xasan Axmad xaggee buu ka shaqayn jirey ?
2. Dhibaatadii ku dhacday Xasan Axmad bal wax ka sheeg ?
3. Xasan goormuu qoridda iyo akhrinta bartay ?
4. Yaa u qoray warqadda Xasan markii dhibaatadu ku timid ?

CASHARKA SADDEX IYO SODDONAAD



**BIYAHA**

Biyuhu waxay ka yimaadaan cirka dabadeedna daad bay noqdaan. Markaas ka dib ayay webiyada, ceelasha iyo laasaska buuxiyaan. Biyuhu haddana waxay ka soo baxaan dhulka ama waxay ka soo burqadaan ilaha. Dadka iyo xooluhuba ma cabbaan biyaha dhanaan ama kuwa cusbada leh ee waxay cabbaan biyaha macaan. Biyaha badda, dadka iyo xooluhuba kama cabbaan, maxaa yeelay, waxay leeyihiin cusbo badan. Biyuhu dalkeenna qaarkii aad bay ugu yar yihiin, dadka iyo xooluhuna baahi weyn ayay u qabaan. Dadka Somalidu tobankii sano oo dambe wuxuu ku dadaalayey sidii uu biyo ku filan u heli

lahaa. Sidaas daraadeed dadku waxay qoteen barkado (waro) ay ku ceshadaan biyaha cirka ka imaanaya. Barkadahaas dadka iyo xooluhuba way ku liibaaneen. Inkasta oo ay dadku ku dadaaleen sidii ay u heli lahaayeen biyo ku filan, haddana biyaha labada webi iyo kuwa ceelasha iyo laasaska kuma ay filna.

Biyuhu dhaqaalaha dhulka kor ayay u qaadaan, maxaa yeelay beeraha ayaa lagu waraabiyaa. Dawladaha sideenna u biyo la' waxay ku dadaalayaan sidii ay ugu intifaaci lahaayeen biyaha badda. Biyaha badda sidii cusbada looga sifeyn lahaa, ayaa dawladahaasi ku talo jiraan. Taasina waxay u baahan tahay shuqul iyo lacag badan. Inkasta oo biyaha badda ay ku badan tahay cusbadu, haddana badda waxaa ku nool nafley kale. Nafleydaas kale waxaa ka mid ah: kalluun, carsaanyo, nibiri, qubo iyo kuwo kale oo badan.

Nafleyda badda ku nool qiimo weyn ayay u leedahay dhaqaalaha horumarkiisa.

Kalluunka waa la cunaa, nuxrur weynna wuu u leeyahay dadka. Nibiriga iyo qubada waxaa laga helaa subag waxtar weyn u leh dadka iyo daawada samayskeeda. Badda haddana waxa laga helaa cusbada. Cusbadu waxay xoojisaa lafaha dadka, maxaa yeelay cayshka dadku ku nool yahay lama cuni kareen cusbo haddii uunan lahayn.

L a y l i :

1. Biyuhu xagee ka yimaadaan xageese ka burqadaan ?
2. Biyaha badda ma lagu dan qunsan karaa ?
3. Naflyda badda iyo webiyada ku nool wax ka sheeg?
4. Dawladaha biyo la'aantu ku dhacday maxay ku dadaalayaan ?

CASHARKA AFAR IYO SODDONAAD



ISBITAALKA

Fadumo waa haweeney reer iyo carruurba leh. Waxayna ka mid tahay xaasaska ku wanaagsan hawlaha guryahooda, raggana aad u xushmeeya. Faduma waxay weligeedba ku dadaashaa inay dhowrto deriska una kaalmayso dadka liita. Qof kastana waxay ula hadashaa si xushma leh. Nasiib darro Fadumo waxay ka mid ahayd dadka mingiska, booranaha iyo saarkaba rumaysan. Maalintii dambe, Fadumo waxaa helay cudur degdeg ah, waxaana isla markiiba ninkeedii telefoon u diray isbitaalka. In yar ka dib, waxaa soo yeeray wiishkii baabuurta dadka jiran

lugu qaadi jiray durbaba yimid. Fadumo waxaa loola orday isbitaalka. Waxaana la geeyey qolka dhakhaatiirtu cudurrada ku baaraan.

Fadumo waa ladnaatay markii dhawr cirbadood lagu duray. Dhakhtarkuna wuxuu aad u amaanay ninkeeda ee si degdeg ah telefoon u soo diray, markii uu cudurka ku arkay. Dhakhtarkii wuxuu caddeeyey in cudarka Fadumo helay, ahaa mdi halis ah haddii aan laga gaareen. Wuxuuna yiri : «Waxaa qof kasta laga doonayaa in markii cudur helo, uu la tiigsado dhakhaatiirta ee sida badan laga helo isbitaalka».

Laba toddobaad ka dib, ayaa Fadumo ka soo baxday isbitaalkii waxa salaan ugu yimid saxiibbadeed oo dhan. Maalintaa waxaa aad u farxay carruurtii iyo ninkeediiba.

Fadumo waxay qof kastaba uga warrantay waxyaalihii ay kala kulantay isbitaalka.

Gaar ahaan waxay aad uga sheekaysay dardaarankii dhakhtarka. Taasoo ahayd iny ku dadaasho inayan rumaysan mingiska, booranaha iyo saarka, kana fogaato wax kasta ee dhibaato u keeni kara caafimaadka.

Waxaa kale ee dhakhtarkii u sheegay Fadumo, in ulajeeddada isbitaalka loo dhisay ay tahay, in lagu daaweeyo dadka jirran.

Dadku waa inuu tagaa oo gartaa waxtarka isbitaalku u leeyahay caafimaadkooda.

Layli:

1. Fadumo maxay rumaysan jirtey ?
2. Isbitaalka maxaa loo dhisay ?
3. Dhakhtarrada iyo faaliyeyaasha kuwee baad rumaysan lahayd ?
4. Fadumo xaalkeeda wax ka sheeg.

## CASHARKA SHAN IYO SODDONAAD

### WILWAAL

Wilwaal wuxuu noolaa qarnigii toddoba iyo tobnaad. Wuxuu ku dhashay magalada Jigjiga. Wilwaal wuxuu ahaa geesi iyo caadil. Xukunkiisa qofkii jebiyana ma uu cafin jirin. Somalinimadana wuu adkeeyey.

Wilwaal wuxuu ahaa gabayaa. Gabayadiisa wuxuu kaga sheekayn jiray goobihii dagaalka ee isaga iyo gaalada dhexmaray.

Isaga oo ku halqabsanaya Axmed Gurey, geesigii Somaliyeed ee furtay dhulka Itobiya qarnigii shan iyo tobnaad, wuxuu gabay ku yiri :

Gaaladii ka gees iyo ka gees webi ka soo guurtay.

Axmad Gurey bar gooyey ee la dhigay goondar dhinaceeda.

Hadday guuto igu soo baxsheen waa gallad Ilaahe.

Golyooy maalintaan iri darkii inay gashaan sheegtay.

(*) Gurey maalintaan dilay colkood inuu go'aan sheegtay.

Garbidaan ku tiirsaday rag inuu garab maraan sheegtay.

Geeraarshe dheer iyo sagaal waran-galaan sheegtay.

Gacan iyo in geed laga dhihiyo gobannimaan sheegtay.

(Wilwaal)

(*) Gaal Gurey: waa ninkii madaxda Xabashada ahaa markaas.

## CASHARKA LIX IYO SODDONAAD

### SHANTA SALAADOOD

Shanta salaadood waa :

| | |
|---|---|
| 1) Subax . . . . . . . . . | laba rakcadood |
| 2) Duhur . . . . . . . . . | afar rakcadood |
| 3) Casar . . . . . . . . . | afar rakcadood |
| 4) Makhrib . . . . . . . | saddex rakcadood |
| 5) Cishe . . . . . . . . . | afar rakcadood |

Salaadda horteed qofku waa inuu weyso qaato, jirkiisa, dharkiisa iyo meesha uu ku tukanayaba inay daahir yihiin :

Layli :

1. Meeqa salaadood baa nagu waajibtay, maxayse kala yihiin ?
2. Qofku salaadda ma iska tukan kara, mase wax hale baa ka horreeya ?

## CASHARKA TODDOBA IYO SODDONAAD

### SHIRKADDA DAYUURADAHA SOMALIYEED

Shirkadda Dayuuradaha Somaliyeed waxa la aasaasay sannadku marku ahaa 1964. Dayuuradaha Somalidu waxay ka shaqeeyaan dibadda iyo gudahaba. Dayuuradaha Somaliyeed waxay maalinwalba u duulaan gobollada iyo degmooyinka Jamhuriyadda Dimoqraddiga Somaliyeed. Shaqaalaha ka shaqeeya shirkadda Dayuuradaha Somaliyeed dhammaanti waa Somali. Dayuuradaha Somalida dadku wuxuu ugu dhoofaa magaalooyin kala fog. Magaalamadax kasta waxa laga dhisay banka dayuuraduhu ay degaan.

Dayuuradaha Somalidu haddana waxay u duulaan dalalka aynu deriska nahay. Dalka Kiniya, Jamhuriyadda Dimoqraddiga Yamaned iyo Xeebta Somaliyeed ee Faransisku gumeysto iyo Tansaniya. Maalin walba waxaa dusheenna ka guuxa dayuurado Shirkaddu ay leedahay. Dayuuradahaasi waxay u duulaan Neyrobi, Cadan iyo Jabuti. Shufeerrada iyo injinyeerrada dayuuradaha Somaliyeed waa dad aqoon weyn u leh cilmiga makaanikada iyo farsamada dayuuradaha. Shaqada shaqalaha dayuuradaha Somaliyeed ma kala joogsato oo har iyo habeen waxay duuliyaan dayuuradaha.

Dayuuradaha Somaliyeed waxay dhulkeenna ku xiraan

dunidakale, gobollada dalkeennana way isaga adeegaan. Dayuuraduhu waa gaadiidkii hawada. Shirkadda Dayuuradaha Somaliyeed waxay wakiil ka tahay dayuuradaha kale ee dunida laga yaqaanno.

Dayuuradahaas waxa ka mid ah :

Alitaliya, Airoflot, Dayuuradaha Afrikada Bari, Dayuuradaha Carabta iyo kuwa Al-Yemda.

Tawraddi Oktobar 1969 markii ay dhalatay ka dib, wax weyn ayaa iska beddeley maamulka Shirkadda Dayuuradaah Somalida. Shirkaddu hadda waxay ku tala jirtaa, sidii dayuurado waaweyn oo jaadka cusub ah loo keeni lahaa dalkeenna.

Dayuuradaha Somalidu waxay xoojiyaan dhaqaalaha dalkeenna.

Layli :

1. Shirkadda Dayuuradaha Somalida goormaa la aasaasay ?
2. Magaalooyinkee dayuuradahennu u duulaan
3. Wax ka sheeg magacyada dayuuradaha ay shirkadda Dayuuradaha Somaliyeed wakiil ka tahay ?

# CASHARKA SIDDEED IYO SODDONAAD

## FURASHADII MAKA

Dagaalkii Bedar ka dib, dadkii Carabta ahaa oo deggenaa inta u dhaxaysa Madina iyo Maka, qaar way Muslimeen qaarna heshiis nabadeed ayay la dhigteen Nebiga. Muddo yar ka dib, Qureyshtii Makad raalli bay ku noqon weydey sidaas, oo waxay bilaabeen dagaallo ay la dagaallamayso Muslimiinta. Dagalladaas waxaa ka mid ahaa dagaalkii «UXUB».

Uxub marna muslinka ayaa adkaaday markii dambase muslinka waa la waabiyey. Nebigu markii uu arkay inay gaaladii ay ballankii ka baxday, ayuu ciidan weyn oo tiradiisu gaareyso toban kun, qalqaaliyey, qalab ku filanna siiyey. Nebigu isagoo hor kacaya ciidankii, ayuu ku soo duuley Maka. Markay Qureyshtii ogaatey in Nebiga iyo colkiisu ay dagaal ugu soo bexeen, bay argagaxeen oo ay isdhiibeen.

Sidaas daraaddeed Maka dhexdeeda dagaal kama dhicin. Nebigu markii uu Maka qabtay, wuxuu bilaabay inuu burbursho sanamyadii tirada badnaa e Kacbada dhex yiillay. Reer Makana wuxuu u oggolaaday inay ku biiraan diinta Islaamka si dhiigooda iyo maalkooduba ugu nabad galaan.

Dadkii Carabta ahaa ee ku noolaa dalka Carbeed mid mid

bay u soo galeen Islaamka. Sidaas baa diintii Islaamku ku xoogowday, Carabtiina isu raacday, dulligii iyo xumaantii ay horay ugu jireenna Ilah uga saaray. Nebigu wuxuu dhintay 12 bishii Mowlid, sanadda Hijriyadu markay ahayd 11 (634 dh. c.), waxaana lagu xabaalay Madina.

L a y l i :

1. Maxay ku kala duwanaayeen dagaalkii Uxud iyo furashadii Maka ?
2. Maxaa Nebigu Maka ugu duulay ?
3. Goormuu dhintay Nebigu ?
4. Xaggee lagu xabaalay Nebiga ?

CASHARKA SAGAAL IYO SODDONAAD

## DAKADAHA DALKEENNA

Dalka Somalida waxaa intiisa badan ku wareegsan bad. Badweynta Hindiya waxaa mara maraakiib u sidda badeeco dalkeenna. Sidoo kale dhulkeennuna wuxuu badeeco u diraa dhulal kale oo aan la leennahay xiriir ganacsi ah. Dakadaha dalkeenna waxa laga dhoofiyo waxaa u badan xoolo nool, muus, subag, luubaan, hargo iyo xabag. Badeecadaas oo dhammi, waxay ku dhooftaa gaadiidka badda. Badeecadaas waa laga saaraa maraakiibta dakadaha. Dalkeennu wuxuu leeyahay dakado badan. Dakadahaas waxaa ka mid ah : dakadda Berbera, dakadda Kismanyo iyo dakadda Muqdisho. Dhulkeenna inkasta oo badi ay meelo badan kaga wareegsan tahay haddana ma laha dakado aad u waaweyn oo cuscusub. Labo dakadood ayaa si wanaagsan wax looga dhoofin karaa, waa dakadda Berbera iyo tano Kismaanyood.

Magaalooyinka xeebaha leh oo ay ka mid yihiin: Marka, Seylac, Bosaso, Calula, Brawe, Hobyo, Qandala, Hurdiya, Xafun, Xis, Maydh, Cadale, Warshikh iyo kuwa kale oo badan, wava laga samayn karaa dakado. Dakaduhu dhaqaalaha dhulka horay bay u dhigaan. Tawradii Oktobar 1969, waxay ku dadaalaysaa sidii horay loogu dhigi lahaa dakadaha dhulkeenna. Dakaduhu dhaqaalaha qayb weyn ayay ka qaataan. Haddaan dhisanno dakado cuscusub, dhaqaalaha iyo ganacsiguba horay ayay u kacayaan.


Magaalada Xamar dakaddeedu weli si wanaagsan uma dhisna. Mararka qaarkood, Xagaagii, waxaa dhaca in badeecadda doonyaha lagu soo rogayo ay qoydo.

Taas oo ay ugu wacan tahay in maraakiibtu meel fog dhigato barroosinka. Haddase waxaa dowladdu ku tala jirtaa in Xamar dakad weyn oo wanaagsan laga dhiso, taas oo fududeyn doonta shaqada dakadda, badeecadduna wax khasaaro ah ma gaari doonaan.

Layli:

1. Magaalooyinka dakadaha wanaagsan leh sheeg magacyadooda ?
2. Dakaduhu maxay u noqdeen lama huraan ?
3. Dakadaha dalkeenna maxaa laga dhoofiyaa ?
4. Dhibaatada dakadda Muqdisho ka warran ?

## CASHARKA AFARTANAAD



### R A D I Y O

Dadka qaar markii ay maqlaan magaca radiyaha, waxaa ay la tahay in uu yahay makiinadda sanduuqa ku jirta oo la dhigto guryaha iyo makhaayadaha lagana dhegeysto wararka, ogeysiiska iyo ii dhehda ama barnamijyada murtida iyo madad-daallada. Laakin waxaa loo baahan yahay, in la kororsado aqoonta oo la ogaado meesha uu ka yimid magacaasi iyo wax-yaalaha uu ka sameysan yahay ama sida uu u shaqeeyo iyo waxyaalaha kale oo la sii xiriira, Radiyo waa magac tilmaa-maya ugu yaran 15 shaqo oo kala duwan, mid kastana waxay noo leedahay waxtar weyn oo ku saabsan xiriirka dadka. Sha-qooyinka loogu isticmaalo radiyaha, tan ugu magac dheer ee qof kasta madaxiisa ku jirta, waa farsamada wartebinta. Radi-yaha farsama wartebintu waa qalabka ay wararka isku gaarsii-yaan dadka ama dalalka kala fog. Wuxuu ku shaqeeyaa farsa-mada isku xirta xoogga xiseysan ee eleterikada iyo hirarka

hawada sare. Hindisaha ama tijaabada wartebintu waxay run ahaan u billaabatay 1865. Waxaa mrkii ugu horreysey lugu guuleystey in war loo kala tebiyo laba qaaradood «Yurub iyo Amerika) sannadkii 1901. Horumarka hindisaha wartebintu wuxuu u kordhay si aayar ah sannadba sannadkii ka dambeeyey. Waxaana hindisahaas ka shaqeeyey rag badan oo ninba tillaabo ku kordhiyey teer iyo maanta.

Farsamadii waxay gaartay in aan radiyaha ka dhegeysanno warar ku saabsan waxa ka dhacay dunida geesteeda kale, ama aan Telefishanka ka daawanno wixii is la markaas dhacaya. Waxaa kaloo la garaay in sawir hawada lugu tebiyo oo is la saacad gudeheed lagu soo saaro dalal kala fog.

Radiyuhu wuxuu waxtar weyn u leeyahay xiriirka dad weynaha dunida, gaar ahaanna xiriirka dawladda iyo dadkeeda.

Layli:

1. Radiyuhu immisa jaad buu u kala baxaa ?
2. Warfaafinta maxay ku kordhisey dunida ?
3. Telefishanku muxuu ku kordriyey ilbaxnimada ?

## CASHARKA KOW IYO AFARTANAAD

### DHISMAHA AFKA

| Keli | Jamac |
|---|---|
| Waan | Waannu |
| Waad | Waynu |
| Wuu | Waydin |
| Way | Way |

| | |
|---|---|
| Anigu waan cabbay | Annagu waannu cabnay |
| Adigu waad cabtay | Innagu waynu cabnay |
| Isagu wuu cabbay | Idinku waydin cabteen |
| Iyadu way cabtay | Ayagu way cabbeen |

Hadalladaan ku dar weero ay ku jiraan fal tegay

Anigu waan . . . . . . . . . . . . .
Adigu waad . . . . . . . . . . . . .
Isagu wuu . . . . . . . . . . . . .
Iyadu way . . . . . . . . . . . . .
Annagu waannu . . . . . . . . . . .
Innagu waynu . . . . . . . . . . . .
Idinku waydin . . . . . . . . . . . .
Iyagu way . . . . . . . . . . . . .

## CASHARKA LABA IYO AFARTANAAD

### BEDAR

Dawladdi Islaamku markii ay dhisantay, ka dib, ayaa waxaa bilowday dagaallo dhexmara gaalada iyo Muslimiinta. Goobtii ugu horreysey oo labada barbar ay ku dagallameen waxay ahayd «BEDAR». Dadka Muslimka ah waxaa abbanduule u ahaa Negigeenni suubanaa, waxaana weheliyey dad tiradooda lagu qiyaasay 313. Waxaase jirey in Gaaladu ay ka badnaayeen (1000) kun qof oo ay wadatey madaxdii qureyshta oo ay ka mid ahaayeen Abu Lahab iyo Abu Jahal, labaduba waxay ahaayeen Nebiga adeerradiis oo uu la jiro abbaanduulahoodii caanka ahaa «Abu Sufyaan».

Gaalada dad tiro badan ayaa laga diley, goobtiina waxaa ku guuleystey muslimiintii iyaga oo u garbeeyey Ilah.

Gaaladii waxay noqdeen wax la diley, wax la qafaashay iyo wax cararay.

Goobtaas dadkii Muslimka ahaa waxaa ugu kordhay magac iyo geesinnimo, libintoodiina waxa laga maqlay meel walba.

Layli:

1. Maxaa lagu magacaabaa goobtii uu ka dhacay dagaalkii ugu horreyey Muslimka iyo Gaalada ?
2. Muslimku intee buu ahaa, gaaladuse inte bay ahayd ?
3. Yaa ku guulaystay dagaalkaas ?

## CASHARKA SADDEX IYO AFARTANAAD

### GABAY

**SAYID MAXAMED CABDILLE XASAN oo dad dibusocod ah oo gumayisiga u adeegayey Gabay kula hadlay, wuxuuna yiri:**

Dood waxaan u leeyahay culimada dafaarka ah,
War aniima doocine idinkaygu diimaye,
Dalkaad iibiseen baa dacarta igu kiciyaye.

Shan hal oo idiin daran dacnigiin ka fiirsada,
Mar waa inaad dayowdeen diirad haddaydun qabateen,
Dadka aydin raacdeen isna waydin diga gubi,

Dillaalkii la siiyana duxna kama helaysaan,
Ninkii idin darraabana ajir iyo ducuu heli,
Dibna deeqa Ebbahay dibinta saari maysaan,

Diin niman lahaynihi dameer caynsan weeyee,
War maxaad dufuleyohow cadaawe ugu daranteen,
Wanka doosha wayn iyo ma dagadaad u xilateen,

(*) Doofaarka.


Dawersigu ma fiicnee qandiga mayska duubtaan,
Awyaalow ma diiddeen jahaadka maw dareertaan,
Warmo danani iyo seef degta maad ku qaaddaan,

Darmaan haad la qooqiyo Doolaab maad u fuushaan,
Wiyilka diirka qaadka ah bidixda mawgu dadabtaan,
Doobbiga xamaalka ah dakarka maad ka goysaan,

Daacufleyda madida ah degdeg maw xabbaadhaan,
Dayrdhalkeeda ramadka ah darata maad ka maashaan,
Idinkaa dalkaba'lee dawlad maad u noqotaan,

Illayn doqoni calaf male dulbaak maxa ka baylahay.

## CASHARKA AFAR IYO AFARTANAAD



**GAADIIDKA**

Markii laga hadlayo gaadiid, dadka qaarkiis waxay la noqotaa in loola jeedo baabuurta, tareynka iyo maraakiibta ama dayuuradaha dadka iyo alaabada u kala gura magaalooyinka iyo dalalka kala-fog. Laakiin runtu waxay tahay, in giddigoodba ay yihiin hindisa cusub oo la socota cilmiga dadka.

Dhowr qarni ka hor, dadka dunida ku nool, dhibaato ayaa ka heysatey xagga gaadiidka.

Maxaa yeelay, waagaas ma ay jirin baabuurta, tareynka,

maraakiibta ama dayuuradaha aan maanta ku dhaqanno. Mana ay jirin jidadka maanta la maro badda, berriga iyo hawadasare.

Waagii hore, gaadiidka la rarto, wuxuu ahaa geela, dameeraha, ama fardaha, in kastoo dalalka qaarkood laga raran jirey dibiga iyo xayawaan kale ee laga helo dalalkaas. Dhibaatadii ka joogtey xagga gaadiidka darteed, waxa aad u yaraa ganacsiga. Waagaa haddii aad damacdo, inaad u safarto dal fog, sii socod iyo soosocod waxay kaa qaadanjirtay bilo badan waxa aad mari jirtey jidad dhaadheer oo qalqalloocan. Dhibaato kalena waxa lagala kulmi jirey xagga nabad gelyada iyo cuntadaba. Waayihii dambe waxa kordhay cilmigii dadka, waxana dalalka qaarkood ka soo baxay farsama cusub. Taasoo looga baxay dhibaatadii ka joogtey xagga gaadiidka. Sidaana waxa ku kordhay ganacsigii ka dhexeeyey dalalka kala fog.


Tallabadii ka dambeysey, waxa kordhay farsamadii gacanta, taana waxa lagu gaaray in uu bato gaadiidku. Meel walba waxa ka furmay jidad safarkoodu gaaban yahay, isuna mara dadka dunida ku nool gees kastaba.

Dunida maanta gaadiidka dadka iyo dalalka alaabada u kala gura, wuxuu gaaray in saacado gaaban lagu maro dalalkii safarkoodu qaadan jirey dhawrka bilood. Waxa laga raystay dhibaatadii ka joogi jirtey xagga nabad gelyada iyo sahayda safarka.

Layli:

1. Intaan gaadiidka cusub jirin maxaa la raran jirey?
2. Gaadiidku immisa jaad buu u kala baxaa
3. Dhibaatada gaadiidkeenna haysata bal wax ka sheeg?
4. Maroodigu ma gaadiid baa ?

## CASHARKA SHAN IYO AFARTANAAD




**KANNAALKA SUWEYS**

Kannaalka Suweys wuxuu isku daraa labada badood, tan cad oo dhexe iyo Badda cas ee woqooyigeenna ku taal. Dhererkiisu waa 169 km, ballaciisuna waa 70 ilaa 125 m. qoddadiisu waa 12 m. Intaan Kannaalka la qodin xiriirka ganacsiga oo ka dhexeeyey Afrika, Asiya iyo Yurub waa yaraa, maxaa yeelay xagga berriga garawaan baa lagu mari jirey, xagga baddana doonyo ama maraakiib ka soo wareega Afrikada Galbeed kol-

kay u socdaan dalalka Afrikada Bari, Koofurka Carbeed iyo Hindiya oo muddo badan u socon jireen.

Kannaalka waa soohdinta kala qaybisa Afrika iyo Asiya. Maraakiibtu goortay Kannaalka marayso, waxaa loo dhiibaa niman aqoon u leh Kannaalka. Iyagaa gudbiya. Markay gudbaan ka dib, baa naakhuudihii markabka watey loo dhiibaa.

Xagga Woqooyi, meesha kannaalka iyo Badda Cad isaga darmaan, waxaa ku yaalla magaalada Bort-Sacid, meeshay Kannaalka iyo Badda Cas isaga darmaanna, waxaa ku taal Bort-Suweys Kannaalka waxaa qoday nin Faransis ah ee la yiraahdo Ferdinando Lessebt oo u shaqaynayey shirkad isugu jirtey Ingiris iyo Faransis, sannadkii 1869. Kannaaalka taliskiisa waxaa la wareegay dawladda Masar 1956.

Layli:

1. Kannaalka Suweys waxtar ma u leeyahay Afrika ?
2. Goormaa la qoday Kannaalka Suweys, yaase qoday ?
3. Kannaalka suweys intaan la furin qaaradda Afrika iyo Asiya sidee bay isku ahaayeen ?
4. Kannaalka Suweys goormay dawladda Masar la wareegtay ?

# TUSMADA BUUGGA


| | | |
|---|---|---|
| Hordhig . . . . . . . . . . . . . . . . | Bogga | 3-4 |
| Arar . . . . . . . . . . . . . . . | » | 5 |
| Higgaad . . . . . . . . . . . . . . | » | 6-16 |
| Alifka oo dhan . . . . . . . . . . . . | » | 17 |
| Xarfaha labalaabma . . . . . . . . . . | » | 18-19 |
| Shalay (weero fudfudud) . . . . . . . . . | » | 20 |
| Maanta (weero fudfudud) . . . . . . . . . | » | 21 |
| Barashada saacadda . . . . . . . . . . | » | 22 |
| Wareysi Gaaban . . . . . . . . . . . | » | 23 |
| Tiirarka Islaamka . . . . . . . . . . . | » | 24 |
| Wadajir iyo Iskaashi . . . . . . . . . . | » | 25 |
| Saaxiib wanaagsan . . . . . . . . . . | » | 26-27 |
| Deriska . . . . . . . . . . . . . . | » | 28-29 |
| Hello . . . . . . . . . . . . . . . | » | 30-31 |

Taallada Daljirka Dahsoon . . . . . . . . » 32-33
Waqtiga: Ayaamaha, Bilaha iyo Sanada . . » 34-35
M a g a c . . . . . . . . . . . . . . » 36
M a a h m a a h y o . . . . . . . . . » 37-38
Labada Gobol isku darkooda . . . . . . . » 39-40
B a n g i g a . . . . . . . . . . . . . » 41-42
E l e t e r i k a . . . . . . . . . . . . » 43-44
W e y s o . . . . . . . . . . . . . . . » 45
D u u n y o . . . . . . . . . . . . . . » 46-47
B u r a a m b u r . . . . . . . . . . . » 48
W a d d a n i n i m o . . . . . . . . . . » 49
Dhismada Afka . . . . . . . . . . . . » 50
Dhalashada Nebigeenna . . . . . . . . » 51-52
D u g s i g a . . . . . . . . . . . . . » 53-54
B i y a h a . . . . . . . . . . . . . . » 55-56
I s b i t a a l k a . . . . . . . . . . . » 57-58
W i l w a a l . . . . . . . . . . . . . » 59
Shanta Salaadood . . . . . . . . . . . » 60

Shirkadda Dayuuradaha Somaliyeed . . . » 61-62
Furashadii Maka . . . . . . . . . . . . » 63-64
Dakadaha dalkeenna . . . . . . . . . . » 65-66
R a d i y a h a . . . . . . . . . . . . . » 67-68
Dhismada Afka . . . . . . . . . . . . » 69
B e d a r . . . . . . . . . . . . . . » 70
G a b a y . . . . . . . . . . . . . . » 71-72
G a a d i i d k a . . . . . . . . . . . » 73-74
Kannaalka Suweys . . . . . . . . . . . » 75-76

**Waxaa lagu daabacay:**
**Madbacadda Dowladda (LAANTA KOWAAD)**